# War saxaafadeed

# Xayiraad adag si loo yareeyo faafitaanka KOOFID-19

Nofeembar 24, 2020 Weydiimaha warbaahinta

Dowlada Alberta waxay ku dhawaaqeysaa xaalad deg deg ah oo caafimaadka bulshada ah waxayna dhigeysaa talaabooyin adag si loo ilaaliyo nidaamka caafimaadka loona yareeyo faafida sii kordheysa ee kiisaska KOOFID-19.

Xayiraadaha cusub iyo xoojintooda waxay yareyn doontaa faafitaanka KOOFID-19 ee bulshada dhexdeeda, waxay ilaalin doontaa isbitaalada, iskuulada iyo ganacsiyada oo furnaan doonaan inta ugu macquulsan, waxayna sifiican u ilaalin doonaan dadka Alberta ee nugul.

Hadda waxaa gobolka ka jira 13,349 xaaladood oo KOOFID-19 ah ayadoo sii kordheysa dadka isbitaalada daryeelka degdega ah la dhigaya loona baahan yahay xayiraad cusub oo adag.

“Waxaan qaadeynaa talaabooyin cusub oo xoogan oo aan bartilmaamedsaneyno si aan u ilaalino noolaha iyo nolosha labadaba isla markaana aan u liidno KOOID-19. Maanta waxaan ku dhawaaqnay xaalad deg-deg ah oo caafimaadka bulshada ah, iyadoo qaadney tallaabo adag si loo ilaaliyo caafimaadka dadka Alberta iyo nidaamkeena daryeelka caafimaad. Tallaabooyinkan la'aantood, waxaan dhowaan joojin doonnaa kumanaan qalliin iyo adeegyo kale oo caafimaad ah. Dadka Alberta waa inay si wada jir ah u difaacaan kuwa nugul. ”

*Jason Kenney, Gudoomiyaha*

“Inta badan dadyowga Alberta waxay sameeyeen intii karaankooda ah si ay ula socdaan talaabooyinka caafimaad ee la bartilmaameedsaday ee la soo bandhigay 10 maalmood ka hor, si kastaba ha noqotee, dadaaladaasi kamay gaabin korusocda KOOID-19 si ku filan. Kiisaska, isbitaalada iyo qaabilaada ICU way sii kordhayaan. Waxaan ku jirnaa waqti xasaasi ah. Haddii aan qaadno tallaabo dheeri ah hadda, waan gaabin karnaa fayraskan, waxaan hubinaynaa in nidaamkayaga daryeelka caafimaad uu leeyahay awood uu kaga jawaabi karo ugana hortegi karo in meherado badan la xiro.”

*Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka*

**Macluumaadka la xiriira**

Macluumaadka KOOFID-19 loogu talagalay dadka Alberta

Khariidadda xaaladda dib u soo celinta KOOFID-19

Tallaabooyinka iyo tilmaamaha caafimaadka dadweynaha ee KOOFID-19

COVID-19 info for Albertans

COVID-19 relaunch status map

COVID-19 public health measures and guidelines

**Warbaahinta kala duwan**

Daawo shirarka warfaafinta

Watch the news conference

**Weydiimaha warbaahinta**
**Christine Myatt**
780-446-2179
Ku-xigeenka Agaasimaha Isgaarsiinta / Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

“Heerka kobaca ee kiisaska KOOFID-19 waa mid laga naxo. Xitaa iyada oo la adeegsanayo tallaabooyinka cusub, sababta oo ah waqtiga dib u dhaca ee u dhexeeya ku dhawaaqista iyo saameynta, tallaabooyinka nidaamka caafimaadka ee dheeraadka ah sida joojinta qalliinnada degdegga ah ayaa loo baahan karaa si ku meelgaar ah si loo hubiyo in isbitaallada ay ula tacaali karaan cudurka la xiriira KOOFID. Dhamaan reer Alberta waa inay qaadaan talaabooyinkan dheeraadka ah si dhab ah; feyraskan ayaa ah mid aad u faafa. Kaliya markaan wada shaqeyno ayaan is ilaalin karnaa, yareyn karnaa faafitaanka isla markaana ilaalin karnaa nidaamkeena caafimaad.”

*Dr. Deena Hinshaw, Madaxa Sarkaalka Caafimaadka*

## Tallaabooyin cusub oo caafimaadka bulshada ah

Raacitaan la'aanta xayiraadaha qasabka ah waxay sababi kartaa ganaaxyo $ 1,000 dambi kasta oo tikit ah iyo ilaa $ 100,000 maxkamadaha dhexdooda.

## Qiyaasaha gobolka oo dhan

### Kulamada dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay

Isla markaaba dhaqan gal ah, xaddidaadaha qasabka ah ee isku imaatinka bulshada ayaa laga dhaqan gelinayaa gobolka oo dhan. Tallaabooyinkani waxay jiri doonaan illaa ogeysiis dambe oo ay ka mid yihiin:

- Lama oggolaan karo shirarka bulshada dhexdeeda ah goob kasta, oo ay ku jiraan goobaha shaqada.
- Kulamada bulshada ee dibada waxaa lagu koobay ugu badnaan 10 qof.
- Adeegyada aaska iyo xafladaha arooska waa inay raacaan dhammaan hagidda caafimaadka bulshada waxayna ku egtahay ugu badnaan 10 qof oo ka-qaybgalayaasha ah. Soo dhaweynta lama ogola.

## Iskuulada

Dhamaan iskuulada oo dhan, Fasalada 7-12 waxay u guuri doonaan wax barashada guriga 30-ka Nofeembar, iyagoo soo afjari doona fasalada horey loo tagi jiray.

- Ardayda ku jirta adeegyada carruurnimada hore iyo Fasallada K-6 waxay fasallada tagi doonaan illaa Dec. 18.
- Dhammaan ardayda waxay ku laaban doonaan barashada guriga ka dib fasaxa jiilaalka waxayna dib u bilaabi doonaan fasallada Janaayo 11, 2021.
- Tallaabooyinkani waa qasab.

Imtixaannada dibloomada waa ikhtiyaari inta sannad dugsiyeedka ka haray. Ardayda iyo qoysaskooda waxay dooran karaan inay qoraan imtixaanka ama helaan in laga dhaafo kal-fadhiyada imtixaanka Abriil, Juun, iyo Agoosto 2021.

**Tallaabooyinka loogu talagalay gobollada xaaladdooda kor loo qaaday**

Waxaa isla markaaba dhaqan gal ah, xaddidaadaha qasabka ah ee goobaha cibaadada, ganacsiyada iyo adeegyadu waxay ka dhaqan galayaan meelaha lagu soo rogay xaaladda (enhanced status).

Tallaabooyinkan ayaa jiri doona illaa ogeysiis dambe.

**Goobaha cibaadada**

- Goobaha cibaadada waxay ku xadidan yihiin ugu badnaan saddex meelood meel ka xaadirid kasta oo adeeg ah.
- Kala fogaanshaha jirka ee u dhexeeya qoysaska iyo weji xir ayaa loo baahan yahay.
- Hoggaamiyeyaasha diinta ku saleysan waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay u dhaqaaqaan adeegyada Khadka tooska ah.
- Kulammada koox ahaaneed ee gaarka ah way sii socon karaan, laakiin waa inay joogteeyaan kala fogaanshaha jirka waana in la raacaa tallaabooyinka caafimaadka bulshada.

**Ganacsiyada iyo adeegyada**

Laga bilaabo Nofeembar 27, xayiraadaha ganacsiga iyo adeegga waxay hoos imanayaan saddex qaybood: oo loo xiray si ugaar ah, una furan ayadoo la raacaayo xayiraadyah, kuna furmay ballmo keliya. Saameynta ay leeyihiin qeybahaan ayaa laga heli karaa halkan: www.alberta.ca/enhanced-public-health-measures.aspx.

Tallaabooyinkani waxay sii jirayaan saddex toddobaad, laakiin waa la kordhin doonaa haddii loo baahdo.

Reer Alberta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay xadidaan booqashooyinka tooska ah ee goobaha tafaariiqda, dukaamada maxalliga ah ayna isticmaalaan uqaadista/ukeenida iyo adeegyada khadka tooska ah, hadday suurtagal tahay.

**Tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay Kaalgari (Calgary), Edmonton iyo bulshooyinka ku hareereysan**

**Shuruudaha maaskarada ee qasabka ah**

Waxaa isla markiiba dhaqan gal ah, shuruudo cusub oo maaskarada khasab ah oo loogu talagalay goobaha shaqada gudaha ayaa loo diyaariyey Edmonton, Kaalgari (Calgary) iyo meelaha ku hareeraysan. Tan waxaa ku jira goob kasta oo shaqaalaha joogaan, waxayna khuseysaa martida, oo ay ku jiraan shaqaalaha geeya adeega, iyo shaqaalaha ama qandaraasleyaasha.

Qiyaastani waxay jiri doontaa illaa ogeysiis dambe.

Dhammaan hagista iyo amarrada sharci ee jira ayaa weli sii jiri doona. Caafimaadka Albeta (Alberta Health), AHS iyo dawladaha hoose ayaa sii wadaya inay si dhow ula socdaan faafitaanka gobolka oo dhan.

**Xaqiiqooyin deg deg ah**

- Faafaahin buuxda ee tallaabooyinka cusub ayaa laga heli karaa halkan (here).
- Waxaa jira 13,349 kiis oo socda iyo 35,695 kiis oo soo kabasho ah ee Alberta.
- Waxaa jira 348 qof isbitaalka KOOFID-19 ay ku jiraan 66 oo ku jira daryeelka degdegga ah.
- Wadarta tirada dhimashada KOOFID-19 waa 492.
- Sharci ahaan, dhammaan dadka Alberta waa inay jir ahaan ka fogaadaan oo karantiilaan galaan markay jiran yihiin ama ay leeyihiin astaamo.
- Nadaafad wanaagsan ayaa ah waxa ugu fiican: dhaqo gacmahaaga si joogto ah ugu yaraan 20 ilbidhiqsi, iska ilaali inaad wejigaaga taabato, qufac ama ku hindhiso xusulka ama shaarka, u tuur istiraashada si ku habboon.